# MAHADHADII MAXAMMAD NUUR (Qaybtii 5aad, ugu dambays)

Qore: Maria von Tiling Tifatire: Boodhari Warsame

April 28, 2013

## SHEEKOOYIN

### Sheeko murtiyeed Soomaaliyeed: Gar Gar Diidday

**“** Maalin ayaa nin geel la jooga hal baadi ahi soo raacday. Ninkii ayaa geelii soo hoyiyay. Markaas ayaa habeenkii geelii libaax u soo dhacay oo hashii dilay. Hashii ayaa bakhtiday. Kolkaa ayaa aroortii ninkii hasha lahaa u yimid oo yiri, “hal baadi ah ma aragtay?” Kii kale ayaa yiri, “haa, hal ayaa shalay i soo raacday, habeenkii xalay ahaa ayaana libaax dilay”. Markaas ayuu yiri, “hashu sidee ayay u tiil, oo summaddee ayay lahayd?” Kolkaas ayuu yiri, “waa taa halkaa taal e orod oo eeg”. Ninkii hasha laha ayaa hahii u tegay oo gartay in ay hashiisii tahay. Kolkaa ayuu iska tegay oo libaaxii raadsaday. Libaaxii oo geed hoosti jiifa ayuu helay oo dilay. Beri dambe ayaa qoladii hasha lahayd ninkii geeliisa ay soo raacday u sheegteen. Dabadeed waa isla gar tageen oo ninkii hashii u sheegteen. Magteedii ayaa lagu xukumay ninkii ay geeliisa soo raacday. Ninkii ayaa hasha magteedii bixi la yiri. Wuxuu yiri [kii la xukumay] “haddii ay sidaa noqotay, waxa aan doonayaa inankayga magtiisii. Ninkaasi waxa uu dilay inankaygii e”. Markaas ayaa la yiri, “inankaaga goorma ayuu dilay?” Waxa uu yiri, “inankaygu waxa uu ahaa libaaxa hasha dilay. Mar haddii ay sidaa noqotay oo aad i tiraahdeen hasha magteedii bixi, isaguna waa in uu libaaxii ii magdhabaa”.

Markaa ayaa raggii guddida ahaa hoos isu la *xanshashaqay* oo yiraahdeen, “ninkaasi hadal gar ah ayuu ku hadlay oo gar ayuu leeyahay, haddase waxa aynnu niraahnaa kala taga!” Markaas ayay yiraahdeen, “orda kala taga! Gartaasu waa gar gar diidday e”. Halkaas ayay ku kala tageen. Waa sidaa.**”**

### Sheeko xariiro qalaad: Xaaboole iyo Boqorkii

**“**Wiil ayaa agoon ahaa hooyadi korisay. Kolkii uu weynaaday ayaa hooyadi tiri, ”hadda nin wayn ayaad tahay e orod oo shuqul doono”. Markaas ayuu hooyadi waxa uu ku yiri, ”anigu meel walba maray oo shaqo waayay. Anigu hadda waxa aan noqonayaa xaabo-gure[1]”. Markaas ayaa hooyadi lacag siisay, xarig iyo *jidib* iibsaday, oo uu maalin walba qoryo doontay. Maalintii dambe ayuu geed weyn helay. Jidibtii ayuu la dhacay. Saddex goor markii uu ku dhuftay ayaa geedkii jinni ka soo baxay. Jinnigii ayaa yiri, ”maxaa aad gurigayga u tumaysaa oo aan kaaga seexan kari waayay?” Wiilkii ayaa yiri, ”arsaaqad ayaan doonayaa”. Kolkaa ayaa jinnigii laba shimbirood wiilkii siiyay. Labadii shimbitood ayuu qaatay. Labadii shimbirood habeenkiina gabdho ayay noqdaan,

[1] Waxaa jirta sheekadan mid u eg laakiin aanay isku si u dhacayn oo ay Soomaalida ka werisay **Margaret Laurence**. Sheekadaa cinwaankeedu yahay *Ahmad The Woodseller* oo sida ka muuqata ah mid Carbeed, sida taniba u tahay, qareenka ay ku socoto waxaa la yiraahdaa Axmad Xatab (Axmad Xaabo-gure). Ka akhri buuggeeda *The Prophet’s Camel Bell*, boogagga 198-202.


**Copyright © 2012 WardheerNews.com**

maalintiina shimbiro.

Maantii dambe ayaa iyaga oo cayaaraya wasiirkii arkay. Wasiirkii ayaa suldaankii u sheegay oo ku yiri, ”suldaanoow, magaalada waxba kama ogid!” Suldaankii ayaa yiri, ”maxaa jira?” wasiirkii ayaa yiri, ”bal adigu caawa i raac”. Wasiirkii iyo suldaankii ayaa is raacey oo waxa ay tageen aqalkii xaabo-gure. Kolkaa ayay arkeen hablihii oo cayaaraya. Wasiirkii wxuu suldaankii ku yiri, ” ninka hablaha ka qaad”. Markaa ayaa wasiirkii iyo suldaankii noqdeen oo aqalki suldaanka aadeen. Dabadeed suldaankii saddex askari ayuu diray oo yiri, ”ninka soo kaxeeya”. Wiilkii ayay soo kaxeeyeen oo suldaankii u keeneen. Suldaankii ayaa yiri, ”la kaalay waxa aad aqalka ku haysato”. Wuxuu yiri, ”anigu waxba ma haysto, wax aan hooyaday ahaynna aqalka iima joogaan”. Suldaankii ayaa yiri, ”been ha ii sheegin e la kaalay waxa aqalka kuu jooga”. Markaa ayaa wiilkii labadii shimbirood keenay. Kolkaas ayay sidii markii hore maalintiina shimbiro noqdeen habeenkiina hablo noqdeen oo suldaankii u cayaareen. Dadkii waaweynaa [madaxdii] ayaa habeen walba suldaankii u yimid oo hablihii arkay. Dadkii oo dhan ayaa la yaabay oo yiri, ”suldaanoow, xaggee ayaad hablahan ka keentay?” wuxuu yiri, ”ninkii xaabo-gure ahaa ayaa aan ka qaaday”.

Maalintii dambe ayaa shimbirihii gaajoodeen. Markaa ayaa suldaankii wasiirkii ku yiri, ”ninkaasi haddii uu shimbiruhu wixii ay cuni lahaayeen u keeni waayo, madaxa ka goo”. Suldaankii ayaa markaa ninkii saddex askari u diray oo yiri, ”ninka soo kaxeeya”. Saddexdii askri ayaa ninkii keenay. Markaas ayaa suldaankii ku yiri, ”haddii aadan shimbirahan wax ay cunaan iyo wax ay cabbaan aad u keeni weydid madaxa ayaa kaa jarayaa”. Inankii ayaa ooyay oo hooyadii ku noqday. Kolkaas ayay tiri, ”maxaa ku haya oo kaa oohinaya?” Hadalkii ayuu u sheegay. Hooyadi ayaa tiri, ”orod oo jidibkaagii iyo xariggaagii qaado oo halkii aad [shimbiraha] ka heshay tag”. Inankii xariggii iyo jidibkii ayuu qaatay oo sidii hooyadi tiri yeelay. Geedkii ayuu tegay oo graacay. Markii uu jidibkii dhowr goor geedkii ku dhuftay ayaa jinnigii ka soo baxay oo yiri, ”maxaa dooneysaa?” Wuxuu yiri, ”shimbirihii suldaankii ayaa iga qaatay, wuxuuna yiri haaddii aadan wax ay cunaan iyo wax ay huwadaan u keenin qoorta ayaa kaa jarayaa”. Markaa ayuu jinnigii soo siiyay wixii uu doonayay. Inankii ayaa dabadeed wixii suldaankii weyddiinayay u keenay. Suldaankii ayaa shaqaadkiisii ku yiri, ”wiilka juuniyad dahab ah siiya”. Markaa ayay dadkii ka hooseeyay [shaqaalihii] ninkii xantoobo haruur ah siiyeen. Kolkii horena sidaa ayay u dhigeen. Xantoobadii haruurka ahayd ayuu qaatay oo aqalkii la tegay. Hooyadi ayaa tuntay oo xabbad kibis ah ka dubtay.

Dabadeed wasiirkii ayaa suldaankii ku yiri, ” ninkan shimbirahan dadka noqonaya keenay wax walba waa keenayaa ee inanta jinniga u dir, oo waxa aad ku tiraahdaa: haddii aadan inanta jinniga ii keenin qoorta ayaan kaa jarayaa”. Suldaankii ayaa ninkii askar u diray oo yiri, ” orda oo ninkii xaabo-gure ahaa soo kaxeeya”. Askartii ayaa keentay. Kolkii askartii keentay ayaa suldaankii ku yiri, ”orod oo jinniga ninka u madaxda ah inantiisa ii keen, haddii aadan ii keeninna madaxa ayaan kaa goynayaa”. Inankii gurigii ayuu ku soo noqday oo misana hooyadi u sheegay. Markaas ayay hooyadi tiri: ” orod, shuqulkaagii qabso oo meeshii tag”. Jidibkiisii iyo xariggiisii ayuu qaatay oo inta meeshii


**Copyright © 2012 WardheerNews.com**

tegay geedkii sidii hore oo kale u garaacay. Jinnigii ayaa soo baxay oo yiri, ”maxaa aad iigu cayaaraysaa oo aad maalin walba gurigayga u tumaysaa?” Ninkii ayaa yiri, ”waxaa jira waxa aadan adigu malaynayn; waxa la i yiri, inanta jinniga keen, haddii aadan keeninna waxaa lagaa goynayaa madaxa ”. Jinnigii markii uu hadalkii maqlay ayuu suuxay.

Hadhowto ayuu miyirsaday. Markaas ayuu wuxuu yiri, ” aniga waxa iga sarreeya tobaatan nin oo inanta ma keeni karo e, orod oo waxa aad ku tiraahdaa: waxa aan doonayaa markab wayn oo lacag iyo dab [hub] ah, oo todoba kun oo dabshidaa ah, toban kun oo *khulaasi* ah, iyo sagaal boqol oo kun oo shaaqada ragga wasiirka oo dhar naagood wada gashan ah”. Wasiirkii ayaa markabkii sameeyay. Markii uu dhammaaday ayaa wiilkii jinnigii ku noqday oo yiri, ”markabkii dhammaa oo dekedda ayuu ku xiranyahay”. Markaa ayay jinnigii iyo wiilkii is raaceen oo markabkii u tageen. Sidaa ayaa markabkii ku dhoofay. Markabkii laba iyo toban casho markii uu socday ayuu magaaladii jinniga rugtiisa ahayd ee **Sinisin**(2) la yiraahdo tegay.

Markabkii markii uu dekeddii ku xirtay ayaa ninkii suldaanka ahaa ee jinniga u madaxda ahaa markabkii arkay oo is yiri bal orod oo markabkan cusub, wayn ee wanaagsan kor. Markii uu yimid ayaa qofkii sallaanka joogey yiri, “adigu waxa aad tahay nin boqor ah oo ku celin kari maynno e, waxa aan se doonaynnaa in aad noqoto oo inantaada soo dirtaa. Sidaa waxaa ugu wacan: dadkayagan markabka ku jira ee aad arkaysaa waxa aannu wada nahay hablo. Waxaa adiga kugu wanaagsan in aad marka hore inantaada soo dirtaa, ka dibna aad adigu timaaddaa”. Dabadeed inatiisii ayaa markabkii fuushay iyada oo aabbaheedna dekedda taaganyahay. Markii inantii hoosta loo rogay [khanka hoose la geeyay] ayuu kabtankii ninkii macallinka ahaa u il-jebshay oo ku yiri, “markabka dhaqaaji”. Markaas ayay markabkii dhaqaajiyeen. Inantu waxa ay moodeysay injinka soconaya in iyada darteed loo dhaqaajiyay oo la tusayo. Markii uu markabkii is rogey ayaa injinkii aad loogu qabtay. Inanta aabbaheedii dekedda taagnaa ayaa arkay in markii dhaqaaqay. Markaa ayuu yiri, “war markabka *minawaarro* iyo *qawaasiyaal* ka daba dira!” Minawarradii iyo bad-quusyadii oo dhan ayaa laga daba diray. Markaa ayaa markabkiina baddiiba quusay oo gees kale oo anay u malaynaynn u kacay. Lix casho goortii ay sii daba socdeen oo waxba waayeen, ayay iskaga noqdeen. Maraakiibtii kale markii ay soo noqotay ayuu isna badda ka soo baxay.

Inantii markii ay aragtay in la soo qaaday ayay kaatunkeedii badda ku tuurtay. Markii markabkii dhowr cisho sii dhaxay ayay magaaladoodii tageen [magaaladii Xaabo-gure]. Markabkii markii uu dekeddii ku soo xirtay ayuu inankii suldaankii ku yiri, “ anigu waxa aan doonayaa in aad halkan ilaa daartaada *bangalad* dhistaa oo inantu ay hoos martaa oo aan la arkin. Waxa kale oo aan doonaya in aanay xoolahaaga ahayn ee xoolaha wasiirka laga dhisaa”. Wuxuu yiri “hawraarsan” oo meeshii dhisay. Inantii meeshii ayay soo martay oo aqalkiisii tagtay. Kolkaas ayaa suldaankii yiri, “ninkan kiish dahab ah siiya!” Haddana sidii hore ayay u dhigeen oo xantoobo haruur ah siiyeen. Ninkii waa iska tegay

---

2 Sheekada Margaret Laurence werisay waxa ay dhigaysaa magaalo **Sennah** la yiraahdo oo **Yaman** ku taal [Sanca?]. Ka tixraac halkii hore.


**Copyright © 2012 WardheerNews.com**

oo aqalkii hooyadi ayuu aaday. Dabadeed suldaankii ayaa inantii ku yiri, “waxa aan doonayaa in aan ku dhunkado”. Waa ay ka diidday. Markaa ayuu haddana yiri, “waayo?” Markaas ayay tiri, “waxa aan doonayaa in aad kaatunkaygii ii keentid; haddii aad ii keentid i dhunko”. Markaa ayuu suldaankii Xaabo-gure askar u diray oo yiri, “orda oo ina Xaabo-gure soo kaxeeya”. Askartii ayaa u tagtay oo ku tiri, “suldaankii ayaa kuu yeeraya”. Markaa ayuu yiri, “muxuu iigu yeeraya?” waxay yiraahdeen, “ annagu war uma haynno waxa uu kuugu yeerayo”. Markaas ayuu u tegay oo yiri, “ suldaanoow maxaa aad iigu yeeraysaa?” Suldaankii wuxuu yiri, “waxa aan kuugu yeerayaa; waxa aan doonayaa in aad inanta kaatunkeedii la kaalaydaa”.

Kolkaas ayaa inankii jinnigii u tegay oo ku yiri, “waxaa la i yiri; kaantunka inanta la kaalay”. Markaa ayuu *jillaab* siiyay oo yiri, “orod oo jillaabo. Kalluunka jillaabta kuu geli doona ayuu kaatunkii ku jiraaye ka la bax”. Inankii sidii ayuu yeelay. Kolkaas ayuu kaatunkii helay oo suldaankii u keenay. Dabadeed suldaankii ayaa inantii ku yiri, “haddaba i dhunko!” Markaas ayay misana diidday oo tiri, “adiga oo ninka guba ma ahee ku dhunkan mayo”. Markaa ayuu suldaankii inankii ku yiri, “haddii aanad inanta wax aan ku dhunkado ii keenin waa ku gubayaa”. Inankii ayaa misana ooyay, oo inta hooyadi u tegay yiri, “hooyo, sulaadaankii wuxuu i yiri; haddii aanan wax uu inanta ku dhunkado u keenin qoorta ayuu iga goynayaa; oo qoorgoyni waa sahal e, wuxuu yiri waa ku gubayaa”. Hooyadi ayaa ku tiri, “orod oo jidibkaagii iyo xariggaagii qaado oo meeshii tag”.

Meeshii ayuu tegay oo jidibkii aad iyo aad ugu garaacay. Markaas ayuu jinnigii aad iyo aad u carooday oo yiri, “mxaa aad maalin walba iigu cayaayiraysaa? Orod oo iga hor tag”. Inankii ayaa yiri, “war ninyahow, maanta cayaayiri ma jirto oo ummuur culus ayaa jirta”. Jinnigii ayaa yiri, “maxaa jira?” Inankii ayaa isna yiri, “waxaa la yiri; saddex casho ayaa cimrigaagii ka hartay oo waa la i gubayaa”. Kolkaa ayaa jinnigii yiri, “ummurtaasi wa sahal e iska aammus”. Wuxuu siiyay quraarad saliid ah oo yiri, “habeen walba marka aad seexanysid is mari”. Ninkii sidii ayuu yeelay.

Markii saddexdii casho dhammaatay ayaa suldaankii aroortii askar u diray. Aqalkii Xaabo-gure ayay tageen oo albaabkiisii garaaceen. Kolkaa ayaa inankii yiri, “waxoogaa yar i suga”, oo inta uu khamiiskii iska bixiyay saliiddii marsaday. Markaas ayuu soo baxay oo raacay. Suldaankii ayay u geeyeen. Markaa ayaa suldaankii yiri, “orda oo waxaa la kaalaydaan todoba awr oo xaabo ah iyo todoba awr oo saliid ah. Dabadeedna inta god weyn qoddaan isaga gudaha u dhiga, xaabada guudka ka saara, saliidda ku shuba, dabadeedna dabka ku qabta”. Sidii ayay yeeleen, oo inta xaabo iyo saliid la kaalayeen, godkii qodeen,ninkii hoosta u rideen, dabkii ku qabteen. Markaa ayaa xaabadii oloshay oo dambaabbasoowday. Kolkii xaabadii bakhtiday ayuu ninkii hoggii ka soo baxay. Inantiina intaa waxa ay ka eegaysay daaqadda. Markaas ayay yaabtay, oo tiri, “waa ninkaa ninka meesha ku keenay ee ehelkaagii kaa soo kaxeeyay. Ninkii dabkaana ku dhiman waayay waa nin ummuur qaba!”

Markaa ayaa suldaankii inantii ku yiri, “waxa aan doonayaa in aad i dhunkato”. Waxay tiri, “haddii aad adiguna sidii ninkaa loo galay isu gashid waa ku dhunkanayaa”. Wuxuu


**Copyright © 2012 WardheerNews.com**

yiri, “hawraar san, waa is gubayaa”. Markaas ayuu dadkii shaqaadka ahaa u yeeray oo yiri, “berri ayaan is gubayayaaye, waxa aad ii gubtaan sidii ninkii loo gubay”. Waxay yiraahdeen, “haye”. Markaa ayuu inankii u yeeray oo ku yiri, “haddii aadan wixii aad is mararisay i siin madaxa ayaa kaa goynayaa”. Inankii ayaa yiri, “waxaa aan is mariyay *khal*”. Markaa ayuu isaguna aroortii markii uu tegayay khal is mariyay oo inta uu meeshii godka looga qoday tegay godkii galay. Iyagiina sidii uu ku yiri ayay yeeleen, oo inta xaabadii godkii guudka ka saareen ayay dabkii ku qabteen. Dabkii ayaa kacay oo xaabadii wada oloshay. Markii xaabadii wada dambasoowday ayaa madaxii dhibiliba meel ku duushay. Halkaas ayuu ku dhitay. Kolkaa ayaa inankii inantii u koray oo inta ay dhunkatay ku tiri, “adigu waxa aad tahay nin yaab leh”. Kolkaas ayay is guursadeen oo inta kaatunkii siisay tiri, “adiga ayaa imminka suldaan ah”, oo haddana u raacisay, “kaatunkaa ma aragtaa, markii aad wax dooneysid faxas, markaas ayaa wixii aad dooneysaaba kuu sahlanaan doonaa e”. Markaa ayuu boqor noqday oo magaaladii oo dhan u talyey.”

**Sheeko carruureed Soomaaliyeed: Xoolajirtii Habar Dugaag**

” Waxaa la yiri; beri ayaa habar dugaag oo dhan xoolo wada lahayd oo xoolaha cisho walba laba raaci jirtay. Cashadii dambe ayaa waraabe iyo dawaco wada raaceen. Markaas ayaa dawacadii iska tagtay oo meeshii ay doontaba aadday. Casarkii ayay timid iyada oo waraabe maalintii oo dhan geelii ku hawshooday, oo gaajo iyo harraad uu u go’ayo. Markaas ayauu yiri, ”xaggee ayaad maata oo dhan ku maqnayd?” Kolkii ay aragtay in waraabihii caraysanyahay ayay tiri, ”bal waraaboow, horta ha ii caroonin ee i maqal, waa aan kuu warramayaa e”. kolkaas ayuu yiri, ”haye, bal ii warraan”. Markaas ayay tiri, ”horta adigu ha moodin in aan dow la’aan ku maqnaa. Maanta oo dhan waxa aan ku maqanaa annaga aawadeen. Waxa aan helay wax aanad adigu madaxaaga ka soo rogteen. Bal horta madaxayga eeg waxa subag ka da’aya! Anigu halkaas ayaan maray oo geed walba oo jirrid weynba madaxa ayaan ku jiiday [hardiyay]. Wax aan maraba markii ugu dambeysay geed weyn helay. Kolkaas ayaan laba goor madaxa ku jiiday. Waxba waa ka soo dhici waayeen. Markii ugu dambeysay ayaan inta ka durduriyay kula soo durdurshey oo aan aad madaxa ugu jiiday. Markaa ayaa subag ka soo baxay. Markaas ayaan inta ka dhergay madaxa ku soo dhamooqday. Sidaas ayaan anigu maanta oo dhan ku maqnaaye, waa sidaa”.

Markaas ayuu waraabe waa nacas e isaguna run moodey oo ku barbaraaray waxa ay ugu sheekaysay. Kolkaas ayuu inta geed weyn kula durduriyay saddex goor madaxa ku jiiday. Waxba ka soo dhici waayeen. Isaga oo madaxu wareerayo ayuu dawacadii ku soo noqday oo yiri, ”maxaa aad beenta iigu sheegtay oo ii lahayd dhirta ayaad subag ka soo heshay? Anigu waxba ka waayaye!” Markaas ayay tiri, ”bal ina keen aniga ayaa ku geynayaa mid aad ka heshide”. Waa uu raacay. Kolkaas ayay geed weyn oo maalintii oo dhan, markii ay reerka baraarka ka soo cuntay, ku shirbaynaysay gaysay. Subagga ay madaxa soo marsatayna waxa uu ahaa baraar ay laysay subagiis. Kolkaas ayay tiri, ” bal horta adigu i arag inta aan geedka ka durkay”. Markaas ayay misana tiri, ” bal adigu halkan tag oo jirrida laba goor madaxa xoog ugu jiid, haddii aad xanuunsatidna ha xusuusan! Marka ugu dambaysana inta ka durugtid xooggaaga oo dhan waxba ha is kala harin ee aad iyo


**Copyright © 2012 WardheerNews.com**

aad madaxa ugu jiid, markaas ayuu subag kaaga soo bixi doonaa e". Sidii ay tiri ayuu yeelay. Markaas ayaa ugu dambeyntii madaxii laba u kala jeexmay. Sidaas ayuu ku dhintay. Dabadeed dawacadii geelii ayay carraabisay oo gurigii geysay. Kolkaas ayaa libaaxii yiri, "waraabe mee?" Kolkaas ayay tiri, "waraabe waa kibray, reer ayuu iska aaday oo maanta oo dhan ma arag. Libaaxii ayaa yiri, "bal ii kaadi caawa ha yimaadee, haddii uu noolaado ninba ma ahi".

Maalintii dambe ayaa goroyo iyo dawaco geelii wada raaceen. Kolkaa ayay dawaco geed har weyn iska seexatay. Gorayadii ayaa maalintii oo dhan geelii ku baaba'day oo harraadday. Dabadeed dawaco ayaa galabtii u timid. Goroyo ayaa tiri, "xaaggee ayaad maanta oo dhan ku maqnayd?" kolkaas ayay tiri, "xabag ayaan i noo doonay. Soo arki maysid waxa aan xabag sido?" Waxaasi xabag ma ahayn e dhagxaan ayay dacalka ka soo buuxsatay. Dhagax weyne kuriyaysan oo ay xabag ku soo damooqday ayay u dhiibtay oo tiri, "bal horta tan sii liq, kuwa kalena ha kaaga dambeeyeen e". Markaas ayay goroyo run mooddey oo liqday. Kolkaas ayuu hungurigii u istaagay oo xagga iyo xagga midna u dhici waayay. Markii habeenkii dumay ayay tiri [dawaco], "ina keen aannu geela carraabinnee, guriga ayaad biyo ka cabbi doontaa oo uu kaaga degi doonaa e". Geelii ayay carraabiyeen. Dawacadii inta awr iska fuushay ayay *laaqaysay*, goroyana geelii ku baaba'day. Markii ay geelii xerada soo geliyeen ayay dawacadii libaxii u tagtay, oo inta salaantay tiri, "libaaxoow, gorayo waa kibirtay oo maantay oo dhan geela ila ma celinayn. Haddii aad beentay moodeyso, bal u yeer oo ha kula hadasho". Libaaxii ayaa gorayadii u yeeray. Kolkaas ayay tiri "quq!" Libaaxii ayaa yiri, "illaa waa runteed waxa ay dawaco sheegaysay oo waa aad kibirtay!" Dabdeedna inta ku booday ayuu qoorta ka kala jabshey. Maalintii dambe ayaa dawaco keligeed geelii raacday. Kolkaas ayay inta koor awr ka furtay halkii geelu daaqi jiray meel ka horreysa geed ku xirtay. Libaaxu koortaas ayuu dhegaysan jiray in ay geela daaq geeyeen. Qorraxdii markii ay dhacday ayay koortii geedkii ka soo furtay oo tiri, "libaaxoow, sow maanta ma aadan maqlayn halka aan geela gaarsiiyey?" Wuxuu yiri, "haa, waa maqlayey oo si wanaagsan ayaad u daaq geysay".

Maanlintii dambe ayaa geelii dabagaalle raacay. Markaas ayuu *oodrogadii* ka rodi waayay oo geelii xeradii ku daahay. Caweysinkii ayaa libaaxii duleedka isa soo taagay iyada oo dawaco iyo dabagaalle ardaaga fadhiyaan. Kolkaas ayaa dawaco inta dabkii afuuftay qodax qaadatay oo cagteedii *fadhay*. Markaas ayay tiri, "war dabagaalloow, qodax ayaa i mudday e boqorka oodda ka rog". Dabagaalle ayaa ooddii rogi kari waayay. Waxay tiri, "dabagaalle waa is yeelyeelayaaye waanu kaa rogeyn. Maantaba waa kii geela daaq geeyay". Libaaxii ayaa carooday oo inta oodrogadii ka soo boodey dabagaalle liqay. Kolkaas ayaa inta uu dabagaalle mindhicirrada googooyey [libaaxa] dabadiisii ka soo dhacay, oo inta guudka uga baxay yiri, "nin yaroo nin weyn dilay ma aragteen?[3]"

Tixraac: Tiling, Maria von. (1925). *Somali-Texte und Untersuchungen zur Somali-Lautlehre*.

Intaa ayay ku egyihiin qaybihii sheekadii xiisaha lahayd ee Maxammad Nuur iyo waayihiisii. Wixii ilduuf ahi waa xaggayga, waxa aan se aad

[3] Nin yar oo nin weyn dilay ma aragteen? Dabagaalle geel jira ma aragteen? [...]?


**Copyright © 2012 WardheerNews.com**

iskugu deyay in aan sida ugu asalsan u soo gudbiyo oo la wadaago inta xiisaynaysa.

---

***Boodhari Warsame***
***bodhari.warsame@gmail.com***


**Copyright © 2012 WardheerNews.com**